**DEKREETO MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Lamb. 88 ee 16 Maay 1972**

**DHISMAHA QEYBTA MADAXA BANAAN EE AMAAHDA DHISMOOYINKA**

**MADAXWEYNAHA**
**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

KADIB markii la arkay Axdiga Kowaad ee Kacaanka Sharci no. 1 ee 21 Oktoobar 1969 oo la xiriira as-aasidda Jamhuuridda Dimuqratiga ee Somaliya;

KADIB markii la arkay Sharciga no. ee 11 Diseember 1970 oo la xiriira dhismaha Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya;

KADIB markii laga baaran degay baahidda loo qabo in la ag dhiso Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya, Qeybta Madaxa Banaan ee Amaahda Dhismooyinka;

IYADOO la tixgeliyey talada Guddomiyaha Bangiga Qaranka ee Somaliya;

IYADO la tixgeliyey talada Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda;

**WAXAA LA AMRAY:**

**Qod. 1**

Waxaa laga dhex dhisay Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya, Qeybta Madaxa Banaan ee Amaahda Dhismooyinka.

Qeybta Madaxa Banaan waxay leedahay shaqsiyad qeynuuni ah, hanti , maamul iyo misaaniyad ka duwan kuwa Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya

**Qod. 2**

Qeybta Madaxa g waxaa saldhi u ah Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya waxaana awood u leedahay in ay ku shaqeeyso goobaha kale ee Bangiga uu ku leeyahay dalka gudahiisa.

**Qod. 3**

Qeybta Madaxa Banaan waxaa lagu maamuli doona Sharcigaan iyo amarro uu soo saari doono Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo xeer nidaamiyaha hoose oo ay Guddiga Maamulka ee Qeybta iyo Sharciga lagu dhisay iyo xeerka Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya haddii ay is qaabili karaan.

**Qod. 4**

Qeybta Madaxa Banaan muddada howl galkoodu waa mid aan xad lahayn.

**Qod. 5**

Ahmiyadda Qeybta Madaxa Banaan ee Dhismooyinka waa in ay bixiso amah loogu tala galay dhismaha guryaha dadka danta yar, guryeenta dadweynaha, iyadoo loo gargaaro doono codsiga shaqaalaha rayidka ee dowladda shaqaalaha jogtada ee Wakaaladaha Dowliga ah, Wakaalada Qaranka ee dhisidda guryaha dadweynaha, shirkadaha wax dhiso ama iskaashatooyin ka kooban kooxo qoysas ama noc kasto iskugu uruuro in ay dhismo guri oo u qalma ay u dhisaan xubnahooda.

Isla howlahaasi waxaa ka faa'ideynsan kara muwaadin kasta ee Somaliyeed oo ku tala galay in uu dhisto guri isagoo aan dan lacag ku uruursi ka lahayn. Qeybtu waxaa

awood u leedahay in ay deymiso lacag si loogu iibsado aqal oo nooc dhaqaalaha yar iyo kuwa madaniga ah.

**Qod. 6**

Haddii ay noqoto in lala wareego hanti ma guurto ah oo ay ka dhacday muddadii rahanka loo soo celin lahaa Qeybta Madaxa Banaan ee Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya kadib markii deyn dhisidda lagu qaatay, qiimaha ugu hoosee ee beeca dhismaha ama guriyaha oo keli keli loo iibinaya waxaa qondeyn doona Qeybta waxaana lagu qori doona heshiis deynta.

**Qod. 7**

Deymaha waxaa loo oggol yahay in lagu iibsado, ama lagu dhiso ama dib- u habeyn lagu suubiyo, ama ballarin ama kor u qaadis guraha dadweynaha iyadoo loo hoggansami doono nidaamka uu qoraayo sharciga iyo kuwa lagu qoray heshiiska deyminta, waqtiga bixinta deyntaasi waxaa lagu tilmaami doona nuqullada lagu lifaaqay heshiiska.

**Qod. 8**

Waxaa dammanad ka ah hantida la rahmay, dul saarka ka dhasha, kadib markii Qeyta ay ibsato – *ope legis*- diwaan gelinta heshiiska rahmida, in ay yeelato xuquuq sharci oo dul saran hantida ma guurtada ah, xatta haddii ay dhismo ku socoto, dammaanadda oo kadib markii laga bixiyo kharaj uu yeelan karo garsooridda maxkamadeed iyadoo loo hoggansami doono amarrada qeexaaya.

Danta gaarka ah waxay dheeri ku tahay dammanadaha caadi ah iyo kuwa kale oo sharciga Qeybta markii la dejinaayo heshiiska rahmidda.

**Qod. 9**

Qeybta Madaxa Banaan waa in ay ugu horeeryntii oggolaada in la isku wareejiyo xuquuda ka soo aroora dhismaha oo uu ku taagan yahay rahanku.

**Qod. 10**

Muddada howlaha iyo qiyaasta dul saarka waxaa lagu qondeyn doona sharciga.

**Qod. 11**

Howlaha Qeybta Amaahda Dhismooyinka waxay hoos imaan doonta kormeerka Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda iyadoo loo hoggansami doono Sharciga lamb 1 , qodobkiisa 2 ee 11 Diseembar 1970 oo khuseeya Dhismaha Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya.

**Qod. 12**

Hantida Qeybta waxay ka kooban tahay:

a) Hanti la isku soo uruuriyey;
b) Hanti dheeraad oo ka yimaaday Dowladda;
c) Deeq keyd dhumay, iyo kuwa nocya kala duwan leh;
d) Deeq iyo ka qeyb gal hey'addo kale oo dan ka leh horumarinta dhismaha.

Deeqda iyo ka qeyb gelidda Hey'adaha waa in uu Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda ku oggolaada amarro kadib markii uu la tashtay Guddomiyaha Bangiga

Qaranka somaliyeed man aka badnaan karaan boqolkiiba 49 ee hantida guud ee Qeybta Amaahda Dhismooyinka.

**Qod. 13**

Qeybtu waxay awood u leedahay in ay soo sarto galal dhismo si loo hirgeliyo howlaheeda dhismo oo ku jaan go'an ilaa iyo 10 u dhig hantideeda kadib markii ay u oggolato deyn gaari kara ilaa iyo kala bar hantida ku qoran qodobka sare ku xusan.

**Qod. 14**

Qeybtu waxa la wadaageysa Bangiga Keydka iyo Amaahda Somaliya xubnaha soo socda:

a) Guddiga Maamulka;
b) Agaasimaha Guud oo leh awooda iyo xilka ku qoran Sharciga lagu dhisay Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya iyo sharciga la xiriira.

**Qod. 15**

Sanad howleedka Qeybtu waxaa bilaabaneysa 1 Jannayo waxayna ku eg tahay 31 Disember ee sanad kasta.

Howsha ugu horreysa waxay hirgeli doonta markii Sharcigaan iyo xeeraka la xiriiro ay hirgalaan, wuxuuna xirmi dooa 31 Diseembar ee sanadka lagu jiro.

Qabka iyo hab loo howl geli doono iyo bandhigga misaaniyadda waxaa go'aamiyey Sharciga lagu dhisay iyo kan Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya.

Guud ahaan, hantida Qeybta kadib markii laga reebo kharajka iyo khasaaraha waxaa loo qeybin doona habka uu sharcigu tilmaamayo.

**Qod. 16**

Haddii ay kormeerka uu Wasaaradda Maaliyaduu ay caddeyso in ay jiraan nidaam-darro, ku xad gudub Sharci iyo xeerarka u dhigan maamulka Qeybta, isagoo la tashtay Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda, iyo Guddomiyaha Bangiga Qaranka ee Somaliya, wuxuu Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka dekreeto ku kala diri karaa Guddiga Maamulka iyo Agaasimaha Guud, isagoo sida ku xusan Sharciga lagu dhisay Bangiga Keydka iyo Amaahda ee Somaliya dib u magacaabi doono Agaasime Guud cusub iyo Guddiga Maamulka oo cusub.

Iyadoo la tixraacayo soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda, iyo Guddomiyaha Bangiga Qaranka Somaliyeed, Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu amri karaa in la kala diro oo la baa'biyo Qeybta Amaahda Dhismooyinka iyadoo loo xilsaarayo Sarkaal loo magacaabay markii ay soo if baxaan arrimaha hoos ku tixan:

a) Markii ay caddato in ay jiraan falal culus oo nidaam darro ah iyo ku xad gudub sharciga, nidaamka iyo amarrada maamulo habka shaqada ee Qeybta;
b) Haddi ay caddato in qasaarada la galay ay qatar gelisay hantida keydka u ah Qeyta iyo kala bar hantida guud ee Qeybta;
c) Markii ay caddato in Qeybtu aysan lahayn kartida iyo hufnaanta gaarsin garta ahmiyadeeda.

Haddii ay noqoto in Qeybta la kala diro, Madaweynaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo ka baraan degay talada Xoghayaha Dolwadda ee Maaliyadda iyo midka Guddomiyha Bangiga Qaranka wuxuu amri doona in hantida Qeybta loo qeybiyo dan guud darted.

Muqdisho, 16 Maay 1972.

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
**Sareeye Guuto Mohamd Siyaad Barre**

Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda
**(Jalle Mohamud Yusuf Weyrah)**